



NY State of Health ayaa ah Suuqa rasmiga ah ee Caymiska caafimaadka York.

Sideen isu diiwaangelinayaa?



Booqo websaytka
nystateofhealth.ny.gov



Wac taleefanka
1-855-355-5777
TTY
1-800-662-1220



Toos ugu tag
Assistor adoo kala xariiraaya
[info.nystateofhealth.ny.gov/
findassistor](http://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor)

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabihi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

Dhammaan caymisyada NY State of Health waxay baxshaan gunooyinka kahortaga oo bilaash ah kuwaaso lagu sameeyo hubino iyo baaritaano caafimaad oo sanadle ah... Laakiin ma ogtahay in caymisyada qaar daloobaan booqashooyinka lagu tago dhakhtarka markaad xanuunsato xataa haddii aadan bixin lacagtii caymisku kaa jaranaayay?

1 Waa maxay booqashada qofka xanuunsan kutagaayo dhakhtarka?

- Booqashada qofka xanuunsan waa booqasho aad ugu tagayso dhakhtarkaaga markaad xanuunsato, sida markuu kugu dhaco hargab ama caabuqa sanboorka.¹

2 Sidee ayay caymisyada daboolla booqashooyinka dadka xanuunsan ku tagaan isbitaalka kahor intaan lacagta caymiska laga jarin u shaqeeyaan?

- Lacagta lagaa jaraayo waa cadad lacageed oo qasab ay tahay inaad dhiibto kahor intaan caymisku daboolin wax adeegyo caafimaad ah oon ka ahayn gunooyinka kahortaga cudurada.
- **Caymisyada qaar ayaa dhiibaaya qarashka booqashooyinka qofka xanuunsan kahor intaadan bixin lacagta caymisku kaa jaraanyo.**
- Tani waxay kadhigan tahay inaad iibsan karto caymis qiimo jaban iyo in adigga iyo qof kasta qoyskaaga kamid ah kuna jira caymiska aad helayaan sadex booqashada dhakhtarka markaad xanuunsan tahay aad ugu tagayso oo bilaash ah ama qiimo jaban kahor intaadan buuxin lacagta caymisku kaa jaranaayo.
- Waxaad wali masuul ka noqon kartaa bixinta qaybta caymiska kaagasoo aada, haddii lagaa rabo.



3 Waa kuwee caymisyada NY State of Health ayaa daboola booqashooyinka qofka xanuunsan dhakhtarka ku aadaayo kahor intaadan buuxin qarashka caymisku jarto?

- Sanadka 2020, **dhammaan caymisyada caadiga ah ee Nuxaasta baroon-jaallaha ah** oo aysan dookhyada ku jirin Koontada Kaydka Caafimaadka [HSA]) waxaa kujiri doona sadex booqasho qofka xanuunsan dhakhtarka ku tagaayo oo bilaash ah adoon dhiibin wax qayb kamid ah qarashka ama lacagta caymisku jarto.
- Qaar kamid ah **caymisyada Dahabka iyo Qalinka** ayaa sidoo lahaan doona sadex booqasho oo bilaash ah kahor intaan lacagta caymisku kaa jarto lagaa qaadin.²
- **Caymisyada Qalinka Caadiga ah** malaha wax lacag ah oo lagaa jaraayo.

4 Sidee ayaan ku codsanayaa caymiska NY State of Health ee bixinaaya sadex booqasho oo bilaash dhakhtarka aan ugu tagaayo kahor intaan wax lacag ah layga jarin?

Caymisyada caafimaadka ee baxsha sadex booqasho oo bilaash ah ama qiimo jaban waxaad ka helaysaa degmo kasta.

Si aad uhesho macluumaad dheeraad ah:

- Booqo aalada dukaamaysiga iyo isbarbardhiga ee caymiska NY State of Health oo ah nystateofhealth.ny.gov
 - Raadi caymisyada ay lasocoto "ST3PCP" magaciisa.
- Booqo barta diiwaangalinta la aqoonsan yahay ee bilaashka ah ee NY State of Health. Si aad uhesho mid kutaala deegaankaaga:
 - Booqo info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor
- Nagasoo wac 1-855-355-5777, TTY: 1.800.662.1220.

1. Booqashooyinka dadka xanuunsan waxaa kujira booqashooyinka aad ugu tagto dhakhtarka Daryeelka Aasaasiga ah ee taqasuska ku ah daawada qoyska, daawada gudaha uurka, daawada carruurta, xaamilada, xubnaha taranka, ama adeegyada caafimaadka dhimirka ee bukaan socodka ama caafimaadka dabecada ama adeegsiga maandooriyaasha.

2. Adeegyada qaarkood, sida baaritaanada shaybaadhka, ayaa la samayn karaa intaad kujirto booqashada qofka xanuunsan waxaana laga yaabaa inaad dhiibto qayb kamid ah qarashka ama lagu daro daryeelka caymisku lacagta kaaga jaranaayo.